

Xanuun iyo dhiigbax marka hore ee uurka ah



the women's
the royal women's hospital

Xanuunka iyo dhiig-baxa waa wax ku badan maalmaha hore ee uurka, mar walbana macnaheedu maaha in ilmihii kaasoo dilmeen.

Dhiigbaxa maalmaha hore ee uurka ah

Haddii aad uurka leedahay dhiigbax

waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga ama GP-gaaga.

Waxaa laga yaabaa inaysan ilmuhu kaasoo dilmin.

Inta hore ee uurka macnaheedu waa 14 usbuuc ka hor.

Waxaad waydiisan kartaa dhakhtarkaaga inuu kuu soo gudbiyo adeega qiimaynta uurka hore ee kuugu dhow. Waxay kaa caawin doonaan shaybaadhka iyo daawaynta ku habboon marxaladda uurkaaga.

Waa inaad u tagtaa waaxda Gurmada ee kuugu dhow haddii:

- aad zaaid u dhiigbaxayso, in ku filan inaad ku buuxiso laba suuf saacad gudaheed
- ay jiraan xinjiro dhiig oo waaweyn, sida wax la eg kubada golf ka
- aad dareemayso xanuun aad u daran oo xubnaha hoose ee jirka iyo caloosha ah
- aad leedahay qandho iyo qarqaryo
- aad dareemayso dawakhaad iyo inaad suuxi rabto oo kale
- aad leedahay dheecaan siilka ka imaanaya oo aan si caadi ah usoo ureyn

Waaxda Gurmada Khadka online ka ee Victoria

Waxa kale oo aad isticmaali kartaa intarneetka si aad ula xidhiidho Waaxda Gurmada Victoria.

- Xilli kasta oo maalin ama habeen ah
- si aad wicitaan fiidiyow ah ula yeelato dhakhaatiirta iyo kalkaalayayaasha gurmada degdegga ah.

Website: vved.org.au

Waxaad u baahan doontaa inaad isticmaasho qalab leh kamarad, sida telefoonkaaga ama kombiyuutarkaaga.

Hubi inaad joogto meel aad ku dareemayso ammaan iyo raaxo.

Maxaad u dhiig baxaysaa?

Dadka qaar ayaa dhiig baxa sababtoo ah ilmaha ayaa kasoo dilmay. Luminta uur kasta waa marxalad adag. Waa inaad kala hadashaa dhakhtarkaaga wixii daawayn ah ama taageero kale oo aad u baahan tahay.

Haddii aad leedahay dhiig-bax aan ahayn ilmo soo dilmay, dhiig-baxu ma dhaawici doono ilmahaaga.

Dadka qaar ayaa dhiig baxa sababtoo ah waxay leeyihiin uur ectopic ah. Uurka Ectopic waa marka uurku ku koro meel ka baxsan ilmo-galeenkaaga. Waa dhif in uur ectopic ah la yeesho. Waxay aad ugu xumaan kartaa caafimaadkaaga iyo dhalmada. Waxaad u baahan doontaa daaweyn.

Dadka qaarkiis ayaa xoogaa ka dhiigbaxa ilmo galeenka agteeda, tan waxaa loo yaqaan implantation bleeding. Takhtarkaaga ayaa arrintan ku ogaan doona ultrasound-ka.

Dadka qaarkiis ayaa laga yaabaa inay u dhiig baxaan sababo aan ku saabsanayn uurkaaga:

- burooyin aan fiicneyn
- infekshan
- isbedel ku yimaadda makaanka afkiisa.

Haddii sawirka uurkaagu aanu waxba muujin laakiin dhiig-baxu sii socdo, waa inaad dhakhtarkaaga waydiisaa inuu kaa baaro sababo kale.

Waa maxay baaritaanada aad u baahan tahay?

Dhakhtarkaaga ama adeega qiimaynta uurka hore ayaa samayn doona baadhitaano. Waxay go'aan ka gaari doonaan baaritaanada aad u baahan tahay iyadoo lagu salaynayo inta toddobaad ee uurkaagu yahay. Waxaad waydiisan kartaa inay sharaxaan baaritaanada.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaan gudaha ah

Dhakhtarka ama kalkaalisada ayaa laga yaabaa inay u baahdaan inay eegaan gudahaaga si ay u hubiyaan haddii:

- Ilmo galeenkaagu uu yahay cabirka laga filan karo marka loo eego uurkaaga inta uu yahay
- ay arki karaan waxa sababaya xanuunka
- ay arki karaan waxa dhiiga kaa keenaya, sida infekshanka ama isbedelada afka ilmagaaleenka..

Waxaa laga yaabaa inay u baahdaan inay sameeyaan baaritaano dheeraad ah haddii ay u muuqato inaad caabuq qabto.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaano dhiig

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaan dhiig si aad u hubiso:

- kooxda dhiigaaga
- haddii aad qabto caabuq.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato baaritaan dhiig si aad u hubiso heerka hoormoonka uurkaaga, oo loo yaqaan hCG. Marka ilmuhu dilmi rabaan, heerarka hoormoonka uurka inta badan hoos ayay u dhacaan. Waxaan sidoo kale u baahanahay inaan ogaano heerka hoormoonka uurkaaga si aan u go'aansano inaan sameyno ultrasound.

Hormoonka uurkaagu waxa laga yaabaa inuu ka hooseeyo sidii la filayey sababtoo ah:

- waxaa laga yaabaa in uurkaagu uusan ahayn inta isbuuc ee aad u malaynaysay
- hormoonka uurkaagu waxa uu bilaabayaa inuu sii ahaado isla heerka un sababtoo ah uurkaagu waa 10 isbuuc
- hormoonka uurkaagu uma kacayo heerkii aan ka fileynay ka hor 10 toddobaad.

Haddii hormoonka uurkaaga uu si tartiib-tartiib ah u kacayo:

- waxaa laga yaabaa in ilmuhu kaa dilmeen
- waxaa laga yaabaa in uurku uu ku beermo banaanka ilmo galeenka
- waxaa laga yaabaa inaad leedahay qaabab hormoon oo kala duwan oo uurkaagu caadi yahay.

Waxaa laga yaabaa inaan u baahanahay inaan sameyno baaritaan dhiig kale laba maalmood ka dib si aan u ogaano in hormoonka uurkaagu uu kor u kacayo. Haddii hormoonka uurkaagu hoos u dhaco waxaa laga yaabaa in ilmuhu kaa dilmeen.

Waxaa laga yaabaa inaad u baahato ultrasound

Waxaa laga yaabaa in dhakhtarkaagu ku weydiiyo inay samayn karaan ultrasound siilka si uu u eego uurkaaga. Dhakhtarku waxa uu wax gelin doonaa siilkaada. Waxad dareemi doontaa sidii baaritaan gudaha ah. Waa u ammaan adiga iyo ilmahaagaba.

Ultrasound way ku caawinaysaa haddii uurkaagu uu ka badan yahay lix isbuuc sababtoo ah waxaa laga yaabaa inaan aragno garaaca wadnaha ilmahaaga. Lix usbuuc ka hor, ultrasound-ku uma badna inuu waxtar yeesho. Laakin ultrasound-ka ayaa muujin doona haddii aad leedahay uur ku baxay banaanka ilma galeenka.

Haddii ultrasound-kaagu uu muujiyo garaaca wadnaha ilmaha

Tani waa war wanaagsan. Ilmuhu inay dilmaan markaas ka dib waa wax naadir ah. Waxaad u sii wadan kartaa daryeelka uurkaaga iyo ballamahaaga sidii loo qorsheeyay. Waa in lagaa baaraa afka ilmo-galeenka haddii waqtigeedii la gaaray ama haddii dhiigbax uu sii socdo.

Haddii ultrasound-kaagu uu muujiyo in ilmuhu kaa dilmeen

Ultrasound-ka ayaa laga yaabaa inuu muujiyo in uurku joogsaday marka la eego korriinka cabbirka kiishashka uurka, cabbirka embriyaha iyo inaysan jirin garaac wadnaha ah.

Mararka qaar waxaan arki karnaa in soo dhicista ay mar hore bilaabatay. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato daawayn si aad u hubiso in dhammaan unugyadii uurka ay ka baxeen jidhkaaga. Takhtarkaaga ayaa kaala hadli doona in tani ay degdeg tahay iyo in kale.

Haddii ultrasound-kaagu aanu muujin embriyaha ama garaaca wadnaha

Haddii aan la helin embriyaha ama garaaca wadnaha, waxay la macno noqon kartaa:

- waa xilli hore oo uurka ah oo lagu arki karo embriyaha.
- uurkaagu maaha mid koraya

Waa inaan sugno oo aan samaynaa ultrasound kale, badanaa 7 ilaa 14 maalmood ka dib. Takhtarkaaga ama adeegga qiimeynta ayaa kuu sheegi doona goorta aad yeelan doonto ultrasound-kaaga xiga.

Waa inaan sugno ultrasound-ka labaad, ma jirto hab degdeg ah oo lagu ogaan karo waxa dhacaya. Waxaa laga yaabaa inaad dhiigbaxdo ama ilmuhu kaa soo dilmaan intaad sugeyso.

Haddii ultrasound-kaagu muujiyo ilmo galeen ebar ah

Ultrasound wuxuu muujin karaa in ilmo-galeenkaagu faaruq yahay sababtuna waxay tahay:

- uurkaagu maaha mid isbuucyo ku filan in lagu ogaado gaaray.
- uurkii si dhameystiran ayuu usoo dhamaaday oo si fiican ayay usoo wada daateen dhammaan unugyada uurka.
- waxaa laga yaabaa inaad leedahay uur banaanka ilmo-galeenka ah oo aad u baahan tahay daaweyn.

Waxaan sameyn doonaa baaritaano dheeraad ah si aan u xaqiijino haddii ay tahay uur dilmay ama uur banaanka ilmo-galeenka ah. Waxaad caadi ahaan u baahan doontaa in dhiig kale lagaa qaado si aan u hubino waxa kale ee daawaynta ama baadhitaanada aad u baahan tahay.

Haddii ultrasound-kaagu muujiyo uur dibeda ilmo-galeenka ah

Haddii aad leedahay uur banaanka ilmo-galeenka ah waxaad u baahan kartaa daaweyn degdeg ah. Uurka banaanka ilmo-galeenka ah wuxuu aad ugu daran yahay caafimaadkaaga iyo dhalmada. Waxaa laga yaabaa inaad u baahato:

- in qaliin lagu sameeyo si meesha looga saaro uurka banaanka ilmo-galeenka ah.
- inaad qaadata daawo si uu uurka banaanka ilmo-galeenka ah u yaraado.
- inaad sugto inta uu jidhkaagu ka dhiigayo unugga uurka ku beermay banaanka ilmo-galeenka.

Dhakhtarkaaga ama adeega qiimaynta uurka hore ayaa eegi doona natiijada baaritaankaaga iyo calaamadahaaga si ay u go'aansadaan daawaynta aad u baahan tahay.

Inta aad sugayso natiijada baaritaanka

Waxa aad samayso inta aad sugayso waxay ku xidhan tahay sida aad dareemayso. Waa inaad isku daydaa inaad nasato oo aad is dejisid haddii aad awooddo.

Haddii aad xanuun dareemayso waxaad qaadan kartaa paracetamol, tusaale ahaan, Panadol. Waa inaad raacdaa tilmaamaha baakada.

Waad sii wadi kartaa inaad qabsato hawl maalmeedkaaga caadiga ah haddii aad awooddo. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad weli dareemayso inay ok tahay inaad shaqeyso haddii aysan shaqadu ahayn mid aad u adag ama daal badan.

Waxaad samayn kartaa galmo markaad is leedahay waa caadi. Dadka intooda badan ma sameeyaan galmo marka ay dareemayaan xanuun ama dhiigbax uu jiro. Waxaa laga yaabaa inaad dareento taas marka dhiigaagu yaraado. Galmada ma kordhin doonto halista in ilmuhu dilmaan.

Waxaa laga yaabaa in uurku dhicisoobo inta aad sugayso baaritaanno iyo natiijoyin badan. Haddii aad leedahay dhiigbax culus oo leh xinjiro iyo xanuun casiraad, waxaa laga yaabaa in uurku kaa dhicisoobayo.

Waa in aad dhakhtar u tagtaa ama aad u tagtaa qaybta degdega ah haddii aad u malaynayso in uurku dhicisoobayo. Caadiyan dhiiga iyo xanuunku waxay joogsan doonaan marka uurka dhicisoobay dhamaado. Haddii dhiigaagu weli culus yahay waxaad u baahan kartaa daaweyn.

Yaad caawimaad weydiisan kartaa?

Waxaad u tagi kartaa:

- dhakhtarkaaga deegaanka ama GP
- adeega caafimaadka bulshada
- qaybta degdega ah ee isbitaalka kuugu dhow
- adeega qiimaynta bilowga uurka.

Kalkaalisada la wici karo (Nurse on call)

Waxaad wici kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.

1300 60 60 24

Isbitaalka Haweenka Royal (Royal Women's Hospital)

Adeegga Qiimaynta ee Bilowga Hore ee Uurka Haweenka

Waxaad wici kartaa inta u dhaxaysa 8-da subaxnimo iyo 4-ta galabnimo. (03) 8345 3643

Xarunta Gurmadka Haweenka

Haddii ay degdeg tahay, waxaad halkan aadi kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.

20 Flemington Road, Parkville.

Waxaad ka hadli kartaa sida aad dareemeyso

Waxaad kala hadli kartaa sida aad dareemayso qof aad ku kalsoon tahay:

- lamaanahaaga, saaxiibkaa ama qoyskaaga.
- dhakhtarkaaga deegaanka ama GP-ga
- la-talin ama xulashooyin kale oo taageero ah.

Waxaad sidoo kale la hadli kartaa qof ku sugan goobta Haweenka.

Shaqada Bulshada

(03) 8345 3050

Daryeelka Ruuxda

(03) 8345 3016

Adiga ayaa go'aansan kara haddii aad rabto inaad uur yeelato

Mararka qaarkood xanuunka iyo dhiig-baxa waxay noqon karaan markii ugu horreysay ee aad ogaato inaad uur leedahay.

Haddii aadan rabin inaad sii wadato uurkaaga, la hadal dhakhtarkaaga si aad u ogaato ilmo iska soo xaaqid ama ikhtiyaaro kale.

Waxaad la xidhiidhi kartaa 1800 My Options

1800 My Options waa khad caawin. Waxaad ula hadli kartaa iyaga si qarsoodi ah oo ku saabsan ka hortagga uurka, ilmo iska soo rididda iyo fursadaha kale.

1800 696 784

1800myoptions.org.au

Taageerada Rabshadaha Qoyska

1800 Respect Khadka Caawinta Qaranka

Taageerada dadka ay saamaysay xadgudubka galmada, rabshadaha guriga ama qoyska iyo xadgudubka.

Waxaad wici kartaa wakhti kasta oo habeen iyo maalin ah.

1800 737 732

1800respect.org.au

Ma u baahan tahay turjubaan?



Haddii aad u baahan tahay turjubaan, Waad codsan kartaa.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Xarunta Soo dhaweynta Haweenka

(03) 8345 3037

1800 442 007

thewomens.org.au

Isbitaalka Haweenka ee Royal Waxay jeclaan lahaayeen inay u mahad celiyaan Northern Health sida ay gacan uga geysteen iyo caawinta tarjumaada macluumaadkan.